| Somali |
| --- |
| Public Notice Education Rights of Children and Youth that are Homeless |

# Aspen Academy
## Ogeysiis Guud
## Xuquuqaha Waxbarasho ee Carruurta iyo Dhallinyarada Aan Guryaha Haysan

Ogeysiiskan guud wuxuu bixinayaa macluumaad ku saabsan xuquuqaha carruurta, dhallinyarada, dhallinyarada aan la wehelin ee guryo la'aanta ah si ay u aadaan iskuul guud ama iskuul guud ee bixiya tacliinta bilaashka ah. Dhallinyaro aan la wehelin waa qof dhallinyaro ah oo aan la noolayn waalid ama qof asaga mas'uul ka ah. Ogeysiiskan waxaa ku jira macluumaad kaa caawin kara inaad ogaato haddii adiga ama qof aad garaneyso loo tixgelin karo inuu yahay qof aan guri haysan isla markaana u qalma adeegyada ay bixiso degmadeenna iskuulka. Carruurta iyo dhallinyarada guryo la'aanta ah waxay leeyihiin xuquuq ay ka mid tahay aadista iskuullada guud. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo fahanka warqaddan, fadlan la xiriir:

Magaca: Melanie Jiskra Jagada: Principal
Iimaylka: melanie.jiskra@aspenacademymn.org Telefoonka: 952-226-5940

Ma u baahan tahay turjumaan? Fadlan noo sheeg si aan u xaqiijinno inaan turjumaan kuu diyaarinno.

Degmadeenna iskuulka waxay si firfircoon u qortaa una bixisaa adeegyo loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada aan guryaha haysan. Haddii aadan guri haysan ama aad garaneyso cunug, dhallinyaro, ama qof dhallinyaro ah oo aan la wehelin oo laga yaabo inuusan guri haysan, fadlan wixii caawimaad ah kala xiriir qofka halkan ku xusan.

Isku Xiraha Degmada: Melanie Jiskra Telefoonka: 952-226-5940
Cinwaanka Degmada: 14825 Zinran Avenue Savage, MN 55378 Iimaylka: melanie.jiskra@aspenacademymn.org

- . *Kumaa ah "qof aan guri haysan"?* Carruurta ama dhallinyarada (oo ay ku jiraan ilmaha shaqaalaha soo galootiga ah) ee aan haysan guri degsan, joogto ah, kuna filan oo ay habeenkii ku hoydaan ayaa la dhahaa qof aan guri haysan. Degsan waxaa loola jeedaa ku dhagan dhulka oo aysan sahlaneyn in la dhaqaajiyo. Joogto waxaa loola jeedaa meesha cunuggu seexdo habeen kasta. Ku filnaansho waxaa loola jeedaa in guriga uu la kulmi karo heerarka casriga ah ee nolosha. Carruurta ku nool qof kale gurigiisa maadaama aanay guryo haysan ama maadaama aysan awoodi karin guryo ayaga u gaar ah waa dad aan guryo haysan. Carruurta ama dhallinyarada guri la'aanta ah waxaa laga yaabaa inay ku nool yihiin:
    - albeergooyin;
    - hoteello;
    - meelaha la dhigto rimoorka (tani loo lama jeedo meesha la dhigto rimoorrada guri ahaanta loo isticmaalo, ee waxaa loola jeedaaa nooc ka mid ah dhul loogu talagalay rimoorrada shanta cago leh ama noocyada kale ee guryaha la guurguurin karo);
    - dhulka dadku dago maxaa yeellay ma haystaan guri ku filan;
    - Hoy degdeg ah ama guri ku-meel-gaar ah;
    - Ama waxaa looga tagay isbitaallada.

  Carruurta iyo dhallinyarada aan guryaha haysan waxaa laga yaabaa inay haystaan meel ay badanaa seexdaan oo noqon karta meel guud ama meel gaar ah oo aan loogu talagalin inay noqoto meel joogto oo ay dadku seexan karaan. Waxay kaloo ku noolaan karaan:
    - baabuurta;
    - meelaha baabuurta la dhigto;
    - goobaha dadweynaha;
    - dhismeyaasha laga guuray;
    - guri heerkiisu hooseeyo (guri aanan lahayn heerarka casriga ah ee nolosha);
    - bas ama saldhigyada tareenka;
    - ama goobaha kale ee la midka ah.

  Haddii aadan hubin, fadlan la xiriir qofka ku xusan ogeysiiskan.

- *Xuquuqaha Waxbarasho ee Carruurta iyo Dhallinyarada Aan Guryaha Haysan?* Iskuulladeenna waxay adeegyo waxbarasho oo isku mid ah siiyaan ardayda iyagoo aan u eegeyn xaaladdooda nololeed. Carruurta iyo dhallinyarada ee guryaha haysan waxay kaloo leeyihiin xuquuqo ay ka mid yihiin:
    - Iyadoo lagu saleynayo waxa u fiican cunuga ama dhallinyarada, cunuga ama dhallinyarada waxay sii dhigan karaan "iskuulka asalka" ama in si degdeg ah looga qoro iskuul kasta oo dadweyne oo ku yaalla goobta ardaygu hadda ku nool yahay. Waxaa kan ku jira iskuul kasta oo ay dhigtaan ardayda aan guryaha haysan, kaas oo ku yaalla goobta cunuga ama dhallinyarada uu hadda ku nool yahay.
    - In adeegyada la siiyo iyadoo aan dib u dhac lahayn, sida gaadiidka iyo barnaamijyada cuntada.
    - Adeegyo iyo barnaamijyo kale oo habboon, sida barnaamijyada loogu talagalay:

 © 2017 TransACT Communications, LLC.
2265940

# Aspen Academy

    - Carruurta hibada u leh aqoonta;
    - Carruurta naafada ah;
    - Barteyaasha Ingiriiska;
    - Waxbarashada farsamada iyo xirfadaha;
    - iyo waxbarashada xilliga iskuulka ka hor.
  - Caawimaad lagu siiyo iskuulka iyadoo loo marayo barnaamijka Title I ee degmada ee uu federaalka maalgeliyo Ardayga guri la'aanta ah wuxuu heli karaa adeegyada Barnaamijka Title I xataa haddii ardayga uusan dhigan iskuul uu maalgeliyo Barnaamijka Title I.
  - Waxqabadka iskuulka ee loogu talagalay waaliddiinta ama mas'uuliyiinta.
  - Ka qaybgalka ciyaaraha fudud, fanka quruxda, ama waxqabadka kale ee ka baxsan manjahka waxbarashada.
  - Hawlwadeennada iskuulka oo ula dhaqma si la mid ah ardayda kale ee guryaha leh;

- *Iskuulka asalka:* "Iskuulka asalka" waxaa loola jeedaa iskuulka ardaygu dhigan jiray ka hor inta uusan guri la'aan noqon ama iskuulkii ugu dambeeyey ee uu cunugga dhigan jiray, oo ay ka mid tahay waxbarashada xilliga iskuulka ka hor. Marka cunugga ama dhallinyarada uu dhammaysto heerka fasalka ugu dambeeya ee iskuulka asalka, markaas "iskuulka asalka" waxaa loola jeedaa iskuulka cunugga ama dhallinyarada dhigan doono heerka fasalka xiga. Waa inay degmadu tixgelisaa waxa ugu fiican cunugga ama dhallinyarada marka ay go'aan ka gaarayso iskuulka ardayga dhigan doono. Gaynta iskuulka asalka waa inay ahaataa dookh ilaa samaynta sidan aysan ahayn waxa ugu fiican ee ardayga ama ay ka soo horjeeddo rabitaanka waalidka, mas'uulka ama dhallinyarada aan la wehelin.

- *Ka warran hadduu jiro khilaaf ku saabsan gaynta iskuulka?* Haddii degmadu gayso ardayga iskuul aan ahayn kii asalka ahaa ama iskuul ay codsadeen waalidka, mas'uulka ama qofka dhallinyarada ah ee aan la wehelin, haddaba waalidka, mas'uulka ama dhallinyarada aan la wehelin waxay rafcaan (cods in laga baddalo) ka qaadan karaan go'aanka gaynta Ardayga waxaa si degdeg ah laga qori doonaa iskuulka uu ardayga ama waalidka codsaday inta rafcaanka laga tixgelinayo. Isku xiraha degmada ee qaabilsan ardayda guryo la'aanta ah ee ku xusan ogeysiiskan ayaa bixin doona macluumaad ama caawimaad ku saabsan sidii rafcaan looga qaadan lahaa go'aanka gaynta.

  *Waa Inaan Cunug ama Dhallinyaro loo Diidin Waxbarasho Guud ee Habboon oo Bilaash ah.*


© 2017 TransACT Communications, LLC.
2265940